BES
BURNSVILLE
EAGAN
SAVAGE
DISTRICT 191
Each Student
Real-World Ready



XANAANADA CARUURTA

Tusmada Qoyska ee Sannad Dugsiyeedka 2016-17 school year

Ku Soo-dhawoow XANAANADA

Degmada iskuulada 191 ee Burnsville-Eagan-Savage waxay ku faraxsantahay inay qoysaska oo dhan u hayso fasalada Xanaanada Caruurta oo lacag la'aan ah oo maalintii oo dhan ah. Maadaama waxyaabaha tacliinta laga filayaa ay sii kordhayaan, fasalada xanaanada caruurta oo maalinta oo dhan ahi habka ugu wanaagsan ee lagu dhisi karo asaaska aqoon waligeed jirta. Waxaan aad ugu faraxsanahay cunugaaga oo fasalada xanaanada caruurta bilaabaya!

Barnaamijikayaga xanaanada caruurtu waa mid dhamaystiran, hal abuur leh oo lagu asteeyey ardayda, tacliintooda, iyo guusha la doonayo inay ka gaaraan horumarka qalbiga iyo bulshada. Macalimiintayada waxaa lagu taba baray xirfada xanaanada iyagoo had iyo jeer diirada ku haya inay arday walba ku caawiyaan inuu koro.

Maxaan baranaa

Caruurta fasalada xanaanada caruurtu waxay xadi kala duwan ku bartaan oo ku hantaan xifado kala duwan. Macalimiinta fasalada xanaanada caruurtu marka ay qorshaynayaan khibrada waxbarashada waxay xisaabta ku darsadaan xadiga kaladuwanaanshaha ardayda. Ardayda heerarkooda kala duwan oo dhan waxaa lagu dhiiri galinayaa inay horumariyaa xirfadooda xornimada shakhsiga ah, xalinta masalooyinka, iskaashiga bulshada inteeda kale, qaadashada go'aamada xigmada ku dhisan, iyo inay waxyaabaha ay hadda baranayaan oo ay u wareejiyaan inay xaaladaha mustaqbalka ku xaliyaan

Fasalada xanaanada waxay kale oo sare u qaadaan xirfada hagaajinta hab-dhaqanka nolasha ee xushamda ku dhisan, masuuliyada iyo badbaada. Manhajkaani waa mid si joogta ah xasaasiyada isha ugu haya, had iyo jeerna u mahadnaqa dhaqamada wanaagsan ee kaladuwan ee umadeena. Khibrad nololeedka khaaska ah ee ardaydayada ayaa sii kobciya manhajka qaninimadiisa. Khaasatan dhaqanka, diinta, iyo khibrad noleedka khaaska ah ardaydayada ayaa sii kobciya manhajka.

Si haddaba sanad dugsiyeedka sida ugu wanaagsan loogu bilaabo, ardayda xanaanada caruurtu waxay iskuulka bilaabaan laba maalmood kadib marka ay ardayda waawayni iskuulka bilaabeen. Sidaas wanaagsan ayey u dhacdaa, sidaa darted macalimiinta fasalada xanaanadu waxay ardaydooda mid walba la kulmaan inta lagu jiro 30-ka daqiiqo mid-midka ula kulmayaan. Kulamadaani waxay macalimiinta u ogalaanayaan inay baahida tacliinta ee ardaydooda fahmaan inta aan xitaa iskuulkii bilaaban. Waa door wanaagsan oo lagu bilaabi karo fasalada xanaanada!

KINDERGARTEN
Fursadaha Diiwaangalin

Iskuulada xaafadaha (ee ardayda lagu diiwaan galiyo ayadoo cinwaankooda loo eegayo) waxaa waheliya oo ay degmadu leedahay sadex iskuul oo hoose oo ardayda degmadu oo dhan ay ka soo aadi karaan waxayna iskuuladaani leeyihiin takhasuska tacliin diirada la saarayo taas oo ay waheliso manhajka xudunta u ah dugsiyada degmada. Ogolaanshaha iskuulada degmada oo dhan laga soo aadi karo waxay ku xirantahay hadba sida boos looga helayo iyo nidaamka mustawahoodu ku salaysanyahay.

• Iskuulka Harriet Bishop Elementary, ee ku yaala xaafada Savage: Waxaa loogu talagalay inay degmada oo dhan ka soo aadaan ardayda fahamada badan ee fasalada u dhexeeya xanaanada ilaa fasalka 5-aad.

• Iskuulka William Byrne Elementary, ee ku yaala xaafada Burnsville: Waa iskuul ay ardayda dhigta barnaamijka STEM (sayniska, tegnoolajiyada, injineerinka iyo xisaabta) ee fasalada u dhexeeya xanaanada ilaa fasalka 5-aad.

• Iskuulka Rahn Elementary, ee ku yaala xaafada Eagan: Waa iskuul ay ardayda dhigta barnaamijka Hindisaada & tegnoolajiyada ay degmada oo dhan ka soo aadi karaan ardayda fasalada u dhexeeya xanaanada ilaa fasalka 5-aad.

Wixii faahfaahin dheeraad ah ee la xiriira iskuulada degmada oo dhan laga soo aadi karo waxaad ka eegtaa bogga interneedka ee degmada oo ah www.isd191.org ama waxaad ka wacdaa lambarka Xarunta soo Dhawaynta 952-707-4180.

ISDIIWAANGALINTA FURAN

Isdiiwaangalinta Furani waa hab ay qoysasku ku dalban karaan isdiiwaangalinta dusiyada ku yaala degmado aan ahayn tan ay deganyihiin. Axdiga la ansaxiyey ee isdiiwaangalinta furani wuxuu dhaqan gal yahay ilaa ilmuhu ka qalinjabiyo dugsiga sare. Wixii faahfaahin dheeraad ah, fadlan wac 952-707-4180.

KALADUWANAANSHAHA (VARIANCE)

Faraqa kala duwanaanshuhu waa fursad u furn ardayda ku nool Demada 191 oo ay ku heli karaan aaditaanka iskuul kale oo aan ahayn kooda. Wixii faahfaahin dheeraad ah, waxaad wac 952-707-4180.

Liiska Waxyaabaha Xanaanada kahor

Ma la yaabantahay waxyaabaha aad u baahantahay inaad dhamaystirto si aad ugu diyaargaroowdo xanaanada? Waa inaad raacdaa liiska jadwalka warbixinaha ee dhamaystiran

WAXBARASHADA FASALADA XANAANADA KAHOREEYA

☐ Waa inaad kaqaybgashaa barnaamijka Waxbarashada Hore ee Qoyska iyo Dhalaanka oo laga helo Xarunta Waxbarashada ee Degmada 191. Communityed191.org ama soo wac talefoonka 952-707-4150.

Waxaad macluumaadka fursadaha kale ee waxbarashada dhalaanka ee hore ka tix raacdaa bogga 6-aad.

DIIWAANGALINTA WAXBARASHA DHALAANKA (REGISTRATION PREP)

☐ Ilmahaaga horay ugu balami baaritaanka caafimadka dhalaanka.
☐ Waxaad balanta ka wacdaa 952-707-4100. Maxsuulka baaritaanka waxaad u kaydisaa diiwaangalinta ilmaha.
☐ Waxaad hubisaa in talaalada loo baahnaa oo dhan ilmuhu qaataan.

WARAAQAHA HAYSASHADOODU AY SHARDIGA TAHAY

☐ Foomka diiwaangalinta ardayga cusub (waxaa laga bogga interneedka isd191.org)
☐ Riboodka baarista caafimaadka dhalaanka ("diiwaangalinta xanaanada ka horaysa" kor ka eeg macluumaad dheeraad ah.)

SIYAABAHA LAYSKU DIIWAANGALIYO

☐ Ilmahaaga ka diiwaangali bogga interneedka ee ah isd191.enrollview.org AMA
Ilmahaaga ka diiwaangali Xarunta Soo Dhawaynta ee ku dhextaala Diamondhead Education Center, 200 W. Burnsville Pkwy. 952-707-4180
☐ Waxaad ka qaybgashaa habeenka wargalinta waalidiinta ee iskuulka ilmahaaga.
☐ Waxaad taariikhda ka eegtaa bogga interneedka ee ah: www.isd191.org/kindergarten.

Isdiiwaangalinta XANAANADA

SIDA LA ISKU DIIWAAGALINAYO
Ardayda cusub ee fasalada xannaanada ilaa fasallka 12-aad waxaa laga diiwaangalinkaraa bogga interneedka ee ah: Registration for all new students in kindergarten through grade 12 takes place online at isd191.enrollview.org. Diiwaangalintu waxay kale oo ka dhici kartaa Xarunta Soo Dhawaynta oo ku taala Diamondhead Education Center at 200 W. Burnsville Parkway.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH WAXAAD KA EEGTAA:
- booqo: www.isd191.org/enroll
- Wac: 952-707-4180
- Emailna u dir: welcomecenter@isd191.org

Baarista Caafimaadka Dhalaanka Yaryar: Maxay tahay?

Baarista caafimaadka dhalaanka ee hore ee lagu hubinayo aragtida, maqalka iyo koritaanka waxaa shardi ah inay ilmuhu maraan inta aanay fasalada xanaanada bilaabin. Baaritaankaan waxaa qoysaska lacag la'aan ku kusiisa Degmada 191. Haddii aadan helin akhbaar la xiriirta wakhtiga ilmahaagu afar jirsado, fadlan ballan qabso adiga oo wacaya Degmada 191 oo Xarunta Waxbarashada lambarkeedu yahay 952-707-4100.

Su'aalaha had iyo jeer la isweydiiyo

S: Goorma ayay carruurta da'doodu gaadhaa in ay xannaanada galaan? J: Carruurta da'doodu gaadhi doonto 5 sano bisha Sabteember 1-da ayaa xaq u leh in loo diiwaangaliyo xannaanada sannad dugsiyeedkaas.

S: Sidee ayaan ilmahayga ugu diiwaangalinayaa fasalada xanaanada? J: Ilmahaaga waxaad ka diiwaan galin kartaa bogga interneedka ee ah: isd191.enrollview.org ama waxaad si shakhsi ah u tagi kartaa Xarunta Soo Dhawaynta ee Dhextaala Diamondhead Education Center. Wixii faahfaahin ee intaa dheer la xiriira diiwaangalinta, fadlan waxaad wacdaa 952-707-4180 ama waxaa email u dirtaa: welcomecenter@isd191.org.

S: Sidee ayaan ku ogaanayaa iskuulka uu ilmahaygu aadayo? J: Waxaad ilmahaaga ka diiwaangalin kartaa bogga interneedka ee ah: isd191.enrollview.org ama waxaad imaan kartaan Xarunta Soo Dhawanyta degmada oo ku taal: Diamondhead Education Center. Wixii macluumaad Dheeraad ah ee diiwaangalinta la xiriira waxaad kala xiriiri kartaa lambarkaan ama 952-707-4180 ama emailkaan: welcomecenter@isd191.org.

S: Sidee ayaan ku ogaanayaa iskuulka uu ilmahaygu aadayo? J: Isticmaal Dugsihelaha (SchoolFinder) oo ku jira bogga interneedka ee degmada oo ah: www.isd191.org /schoolfinder, ama waxaad degmada ka wacdaa: 952-707-4180.

S: Haddii aan ka baxsanahay deegaanka iskuulada degmada 191, caruurtaydu halkaan iskuul ma ka dhigan karaan? J: Haa, waan soodhaweynaynaa ardayda doonaysa inay dhigtaan dugsiyadeena. Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan isdiiwaangalinta iyo xulashada kale ee dugsiga aad aadi kartid, fadlan kala xirriir Xarrunta Soodhaweynta 952-707-4180.

S: Waa sidee maalinta caadiga ah ee xannaanadu? J: Guud ahaan maalitu caadiga ahi waxay ku bilaabataa salaan, wax wadaag, wararka cusub, iyo ogaysiisyada. Intaa kadib ardaydu waxay gudagalaan howlaha akhriska oo ku ay jiraan laba saacadood maalin walba, kadibna waxay bilaabaan barashada waxyaabo la xiriira xisaabta oo ay kusii jiraan ilaa hal saac. Ardaydu waxa kale oo ay la shaqeeyaan macalimiin takhasus u leh arimo khaas sida meelaha jir dhiska, farshaxanka, sayniska, muusikada iyo waxyaaba kale oo dheeraad ah. Waxa jira macmacaan iyo waqtiga caadiga ah ee xulashada ciyaarta. Waxa kaloo laga yaabaa inay kujirto waqti nasasho, khusuusan sannaad dugsiyeedka bilowgiisa.

S: Sidee ayaan ku heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Degmada 191?
J: Booqo bogga interneedka degmada oo ah www.isd191.org ama waxaad wacdaa Xarrunta Soodhaweynta 952-707-4180.

Ka caawi ilmahaga u diyaargarowga XANAANADA

Xiliga kala guurka ee iskuulka wuxuu ilmaha u sahlanaadaa marka ay awood u helaan inay sameeyaan qaar ka mid ah hawlaha hoos ku qoran:

UDIYAAR GAROOBAAN AKHRISKA:
- Dhagaysiga sheekooyinka iyo heesaha rakaada leh
- fiirsiga/daawashada buugta masawirada kaliya ah
- Dhihitaanka magacooda koowaad iyo kooda labaad
- Qorista magacooda kowaad
- Aqoonsiga magacooda kowaad oo qoran
- Aqoonsan kara xarfaha alifbeetada
- Samayn kara waxyaabo fudud oo la faray

U DIYAARGAROW XISAABTA:
- Baro tirrinta
- Aqoonsiga tirooyinka/lammbarada qaarkood
- Aqoonsiga qaababka aasaasiga ah sida afar gees is-le'eg, seddex geesoole iyo goobada
- Kala soocida walxaha kala duwan midabahaantooda, xajmigooda iyo qaabkooda
- Ka hadlka/garashada waxa "buuxa iyo madhan," "sarreeya iyo hooseya,"dheer iyo gaaban" ilmaha oo ku ciyaaraya walxaha kala duwan, buuxinta weelasha, iwm.

U DIYAARGAROW MADDADAALADA:
- Baro isticmaalka qalimada midabaynta (crayons), qalin qoriga, maqasyada iyo xabagta/koolada
- Baro wadaaga (wax qaybsiga)
- Ciyaarta kadi caawi kala xeraynta qalabka
- Aqoosiga magacyada midabada

U DIYAARGAROW INAAD ISKAA WAX U QABSATO:
- Xirato siibkaaga/shinyeerkaada, guluusyadaada/badhamadaada iyo xargaha kabaha
- Isticmaasho warqadda tishiyuuga marka aad qufacaysid ama hindhisaysid
- Aqoonsatid waxaad leedahay sida, jaakaddaada, sannduuqaada/boorsadaada qadada, iwm.
- Wax cunni kartid adiga oo aan lagu sii-siin
- Iska bixisid iyo gashatid jaakadka
- Kaligaa musqusha isticmaal, biyahana ku siidaa oo kaligaa faro xalo/dhaqo

Dhalaanimada Hore Fursadaha Waxbarashada

WAXBARASHADA QOYSKA EE DHALAANKA YARYAR

Barnaamijka Early Childhood Family Education (ECFE) wuxuu waalidiinta ku taageeraa dadaalka ay ugu jiraan inay koritaanka caafimaadka leh iyo horumarka ilmahooda. Barnaamijka ECFC wuxuu bixiyaa fasalo iyo xaflado badan oo kala duwan oo ay ku jiraan:

- Hal-mar oo asbuuciiba la ciyaaro
- Barnaamijyo waxlagu barayo ardayda Wax-ku-Barta Luuqada Ingiriisiga
- Fasalo loogu talagalay qoysaska ku hadla Spanish-ka
- Dhacdooyin khaas ah oo loogu talagalay xiriirka bulshada

UDIYAARGAROOWGA ISKUULADA

Barnaamijka Diyaargaroowga Iskuuladu wuxuu caruurta fasalada xanaanada ka horeeya iyo qoysaskooda u diyaariyaa fasalada xanaanada caruurta:

Barnaamijka Tiny Tots: waa barnaamij maalin nuskeed ah, oo sanadka oo dhan soconaya kaas oo ay caruurtu dhiagan karaan maalin ilaa sadex maalmood asbuuc walba. Ulajeedada laga leeyahay waa in sare loo qaado kartida ilmaha ee laxiriirta ladhaqanka bulshada iyo xoojinta qalbigooda taas oo ay ciyaarta ku baranayaan.

Barnaamijka Kindergarten Jumpstart: Caadi ahaan waa fasal ka mid ah fasalada khibrada xanaanada oo diirada lagu saarayo in ilmaha lagu xiisa galiyo waxbarashada. Ardaydu waxay barandoonaan, badbaada raacista baska, lakulanka dadka ka shaqeeya dugsiyada hoose iyo barashada waxa macnaheedu yahay in fasalada xanaanada la dhigto.

Barnaamijka Ready to Grow: waa maalinta oo dhan waxaana loogu talagalay caruurta da'doodu u dhaxayso lix asbuuc ilaa sadex sano, wuxuu bixiyaa waxbarashada xanaanada hore iyo khibradeeda, oo lagu bixinayo bay'ad ku dhisan dhiirigalin iyo in ardayda la tusiyo wixii ay baranayaan taas oo u noqonaysa mid sii dheeraysa hawlihii guriga.

Barnaamjika Ready to Learn: Waa barnaamij maalintii oo dhan socda oo ay wax ku bartaan caruurta da'doodu u dhaxayso 3 ilaa 5. Waxaa halkaan diirada lagu saarayaa xirfada horumarinta u diyaargaroowga iskuulka aydoo hadafkuna yahay in la abuuro in xaalada ku meelgaarka ah lagaga baxo si guul leh oo debecsan oo loogu gudbo barnaamijka xaanaanada ee degmada.

DIYAAR! Ma u Tahay Xanaanada:

Waa barnaamij lacag la'aan ah oo loo asteeyey inuu caawiyo qoysaska inay u diyaargaraariyaan ilmahooda oo leh xirfadaha looga baahanyahay si ay u bilaabaan ugu sii wadaan fasalada caadiga ah inta tacliintooda ku jiraan oo dhan. Fasaladaani waxay waalidiinta ku dhiirigalinayaan inay caruurta lahadlaan, la heesaan, wax la akhriyaan, oo ay caruurtooda la ciyaaraan hab fudud oo xaqiijinaya qoraalka biloowga ah, xisaabta biloowga ah, xirfado sare u qaadaya qalbiga ilmaha. Waxaad wacdaa Xarunta Waxbarashada Bulshada 952-707-4150 si aad ula haddasho iskuduwaha barnaamijka READY! Xanaanada.

Barnaamijka Waxabarasha Bulshadu wuxuu bixiyaa fursado badan oo loogu talagalay inay caruurta yar yar ku caawiyaan inay gaaraan fasalada xanaanada. Wixii macaluumaad dheeraad ah ee aad arintaan ama barnaamijyada kale uga baahantahay fadlan booqo: www.communityed191.org ama wac: 952-707-4150.

RAACITAANKA GAADIIDKA BASKA

Raacitaanka Gaadiidka baska waxa loo heli karayaa:

- Dhamaan ardayda dhigata dugsiyada hoose ee ku nool masaafo iskuulka u jirta hal mayl iyo wax ka badan
- Dhamaan ardayda dugsiyada sare ee ku nool masaafo ka badan 1.5 mayl

MASAAFADA AY ISU JIRAYAAN GURIGA IYO MEESHA BASKU ISTAAGO:

- Ardayda dugsiyada hoose waa inaanay meesha basku istaago ka soo socon in ka badan toban-oo-sadex ama mayl toban loo qaybiyey sadexmeelood oo ka mid ah.
- Ardayda Dugsiyada Sare waa inaanay meesha basku istaago guriga uga soo socon in ka badan mayl toban meelood loo qaybiyey todoba meelood oo ka mid ah.

Waxaa dhicikara meelaha qaarkood masaafada basaska laga soconayo siyaabo kale loo tixgaliyo ayadoo loo eegayo dhinaca joqoraafiga arima la xiriira sida ay tixgalinayaan Gudoonka Gudiga Waxbarashadu ama/iyo hadba sida ay u arkaan waaxda gaadiidku. Haddii aad haddaba qabto wax su'aala oo la xiriira gaadiidka basaska, fadlan wac: 952-707-2069.

HORAY-UBILAABISTA XANNAANADA

Oggolaashaha ugu horeeya ee lagu gali karo xannaanada waxay ku xirantahay 5 jirsiga da'da ilmaha mark bisha Sebteember 1da tahay ama ka kor. Waxa laga yaabaa in mudnaan gaar ah oo hore ay ugu bilaabayaan la siiyo ilmaha shanta sanno gaaraya bisha Sebteember ama Oktoobar kuwaas oo muujiya inay leeyihiin aqoon sare oo diyaar ah. Waalidiinta danaynaysa in ilmahoodu horay u galaan fasalada xanaanada, waxaa laga rabaa inay maamulaha u keenaan codsi qoraal inta ka horaysa 1-da bisha Abriil. Jadwalka wakhtiga waxaa laga yaabaa in laga daayo qoysaska degmada ku cusub ee laga yaabo inay mudanyihiin inay caruurtoodu horay u galan xanaanada. Wixii macluumaad dheeraad ah ee nidaamkaan uga baahantahay waxaad la xiriirtaa xaafiiska diiwaan galinta oo lambarkiisu yaay 952-707-4115

CUNTADA ISKUULKA

Quraac iyo qaddo ayaa diyaar ku ah iskuulada oo dhan, sidoo kale quraac lacag la'aan ah ayaa la siinayaa ardayda fasalada xanaanada oo dhan. Cuntada iskuulka qaymaheeda iyo nafaqadeeduba waa fiicanyahay aad ayayna ugu haboontahay qoysaska mashquulka ah. Waalidiinta waxaa laga filayaa inay qiimaha cuntada horay u bixiyaan ama haddii kale waa in lacagta la bixiyaa wakhtiga ilmaha cuntada la siiyo. Ayadoo loo eegayo dakhliga waalidka waxaa dhici karta in ilmuhu uu xaq u leeyahay cunto lacag la'aan ah ama qiimaheeda la jabiyey waase in marwalba arjiga la soo buuxiyo. Araajida waa in la ogalaadaa inta aan faa'iidadaan lahelin. Wixii faahfaahin dheeraad ah waxaad ka eegtaa bogga internetka degmada oo ah www.isdd191.org/foodservice ama waxaad wacdaa 952-707-2051.

ADEEGYADA LAXIRIIRA XAALADA KALAGUURKA AH, FASALADA XANAANADA KAHOREEYA IYO WAXBARASHADA KHAASKA AH, IYO ADEEGAYADA LAXIRIIRA

Waxbarashada Khaaska ah iyo Adeeyada La Xirriira ayaa diyaar ugu ah dugsiyada hoose carruuta dhigata xannaanada taas oo loo eegayo Barnaamijka Waxbarshada Qofahaaneed (IEP). Kooxda IEP-da ee ilmaha, oo ay ku jiraan waalidiintu, ayaa go'aaminaya nooca iyo inta ay le'egtahay waxbarashada khaaska ah iyo adeegyada la xiriira ee uu qaadanayo ilmo kastaa. Waalidiinta ilmahoodu da'aahaan mudnaata/xaqa u leeyihiin, in la siiyo adeega wabarashada khaaska ee carruurnimada hore, waxay shirk ku saabsan kala guurka la qaadanayaan shaqaalaha dugsiga hoose. Kooxda (IEP)-da ayaa go'aaminaysa meelaynta waxbarashada khaaska ah taas oo saamayn ku yeelan karta goobaha xannaanada ee ardayda qaarkood. Inta badan, ardayda la siiyo adeega waxbarashada khaaska ah waxay aadaan dugsiyada dariskooda ah.

Carruurta qaar ayaa laga yaabaa inay aadaan meelo aad khaas u sii ah ama "rug-cayiman" oo leh barnaamij dabooli karta bahidooda. Barnaamijyadani waxaa laga heli karaa dhowr dugsiyada hoose ka mid ah. Go'aaminta meelaynta dugsiyadani waxaa sameeya kooxda (IEP)-da ee ilmaha.

DARYEELKA WAQTIGA ISKUULKA KOHOR IYO KABACDI

Mashruuca Waxbarashada Daweynaha/Bullshada K.I.D.S. waxay bixisaa barnaamij baaxad leh oo ay siiso ardayda xannaanada ilaa fasallka 6aad waqtiga dugsiga ka hor iyo ka bacdiba. Manhaj isku dheeli tiran oo laga helayo waxbarasho tayo leh, barbaarinta xirfadaha bullshada iyo waxqabadyo madadaalo leh, meel nabadgalyo sugan iyo madadaalaba leh leh.

Mashruuca K.I.D.S. waa mashruuc wadanka oo dha laga aqoonsanyah ay oo la yaqaan tayada wanaagsan waxaana aqoonisgaa siiyey Natiional After-School Association. Wixii macluumaad dheeraad ah ee aad arintaan uga baahanthaay waxaa ka eegi kartaa www.communityed191.org ama waxaa wacdaa xaafiiska Waxbarashada Bulshada oo lambaroodu yahay 952-707-4150.

BES
BURNSVILLE
EAGAN
SAVAGE
DISTRICT 191
Each Student
Real-World Ready

XANAANADA CARUURTA

“Ardaydu waxay maalin walba wajigayga S ka keenaan qosol waxayna jira waxyaabo ay i baraan maalin walba.

– SIDAA WAXAA YIRI SABRINA DAHL, OO AH MACALIMAD WAX KA DHIGTA XANAANADA